



Lejre Kommune  
Møllebjergvej 4  
4330 Hvalsø

Tlf: 46464646  
Fax: 46464615

Email: [sikkerpost@lejre.dk](mailto:sikkerpost@lejre.dk)

<input type="checkbox"/> Waxaa magaca muwaadiniinta (borgerservice) <input type="checkbox"/> Waxaa magaca qofka ka reebidda codsanaya	<input type="checkbox"/> Waxaa magaca helay <input type="checkbox"/> Aqoonsiga la bixiyey <input type="checkbox"/> Xuruufta magaca ugu horraysa	KLE 23.15.15G01 • Aqoonsiga kiiska
Magaalada qofka haya awoodda qareenimo		

### Awoodda qareenimo ee lagu codsado ka reebidda Boostada Dijital ah ee muwaadiniinta loogu talagalay

tix. Sharciga Boostada Dijital ah ee Dadweynaha ee Denmark

Foomkani waa turjumaadda Soomaali ee FD 001F. Waa FD 001F, ee waaajib ah in la buuxiyo oo loo dhiibo xarunta adeegga muwaadiniinta (borgerservice).

Guud ahaan, masuuliyiinta dawladda ee Denmark waxay muwaadiniinta waraaqaha boostada ugu diraan nidaamka dijital ah - Boostada Dijital ah.

Waxaad ka reebnaan kartaa in aad waraaqahaaga ku hesho Boostada Dijital ah haddii aad buuxinayso mid ka mid ah sababaha ka reebidda ee hoose. Halkeeda waxaad waraaqahaaga ku heli doontaa sanduuqa dhab ah ee waraaqaha laguugu rido iyadoo laguugu keenayo boostada waraaqaha ee caadi ah.

Waxaad ka reebidda heli kartaa marka aad buuxiso foomka FD 001A Codsiga ka reebidda Boostada Dijital ah aanad tagto xarunta adeegga muwaadiniinta (borgerservice) ee magaaladaada. Haddii aad tagi weydo, waxaad ka reebidda codsan kartaa marka aad foomkan buuxiso aanad u dhiibto qof kuu geyn kara xarunta adeegga muwaadiniinta (borgerservice) ee magaaladaada.

Ka reebiddu ma khusayso waraaqaha Boostada Dijital ah oo keliya lagu diri karo marka shuruuc kale la raaco. Wixii khuseeya xaaladaha aanay ka reebiddu ku dabbakhmayn, masuuliyiinta habboon ayaa taas ku ogaysiin doona.

Haddii aad u baahan tahay oo keliya in lagaa caawiyi akhriska boostadaada dijital ah, halkii aad ka dalban lahayd ka reebidda waxaad qof kale u oggolaan kartaa in loo rukhseeyo in uu kuu akhriyo waraaqaha kuugu jira Boostada Dijital ah. Xarunta adeegga muwaadiniinta (borgerservice) ayaa diyaarin karta rukhsaynta akhriska. Waa in aad tagto xarunta adeegga muwaadiniinta (borgerservice) ama buuxiso foomka FD 011 Awoodda qareenimo si laguugu diyaariyo rukhsaynta akhriska.

Marka aan foomkan saxiixo, waxaan sheegayaa in aan rabo in la iga reebo Boostada Dijital ah, maxaa yeelay

<input type="checkbox"/>	Waxaan buuxinayaa mid ka mid ah sababaha soo socda ee ka reebidda: Waxaan si joogto ah uga tagay Denmark Anigu iminka kuma qorni cinwaan joogto ah ama meel aan deggan ahay oo Denmark ku yaalla Waxaa aniga ficiil ahaan igu adag in aan helo saxiixa dijital ah ee dadweynaha (NemID) Waxaan qabaa naafonimo jirka ama maskaxda ah oo ii diiddan in aan isticmaalo Boostada Dijital ah Si fiican uguma hadlo luqadda Danishka taasoo igu adkaynaysa in aan isticmaalo Boostada Dijital ah Waxaan deggan ahay xaafad aanay suurogal u ahayn in laga helo khadka internetka (xawaaraha durdurka hoose oo ugu yaraan ah 512 kbit/lbiriqsi) Anigu kumbiyuutar kuma haysto gurigayga ama meesha aan deggan ahay
<input type="checkbox"/>	Fadlan xaqiijin qoran ii soo dira haddii ka reebidda la ii oggolaado
<input type="checkbox"/>	Haddii ay ii yaallaan waraaqo ku jira boostada dijital ah oo aanan la akhrinin, waxaan jeclaan lahaa in kuwaas boostada caadi ah la iigu soo diro

Maxaa dheer, waxaan halkan ku sheegayaa in aniga la i ogaysiiyey in bayaanka aan diray la saari karo ciqaabmarinta dhaarbeeneed marka la raaco qodobka/§ 163aad ee Xeerka Dembiyada ee Denmark.

<b>Qodobka/§ 163aad ee Xeerka Dembiyada ee Denmark</b> Qofkii kastee keena bayaanno qalad ah ama ku markhaati fura wax qofka laga hadlayo uusan ka war haynin, oo loo isticmaalo dacwado la xiriiira dadweynaha, oo lagu bixiyo qoraal ama warbaahin kaloo la akhrisan karo, waxaa la saari doonaa ganaax, ama xabsi aanan ka badnayn afar bilood.
---

<b>Boostada Dijital ah iyo maamulka macluumaadkaaga ee magaalada</b> Macluumaadka ku saabsan kaa reebidda waxaa lagu qori doonaa Boostada Dijital ah waxaana arki kara masuuliyiinta dawladda ee habboon. Macluumaadka kale ee ku saabsan sida ay magaaladu uga shaqaysay codsigaaga ka reebidda Boostada Dijital ah waxaa diiwaangelin doonta magaalada, laakiin waxaa loo gudbin doonaa oo keliya masuuliyiinta kale ee dawladda, shirkadaha iwm ee iyagu sharci ahaan xaq u leh macluumaadka ama hawlo ku qabta magaca magaalada. Waxaad xaq u leedahay in aad ogaato macluumaadka magaaladu ay adiga kaa hayso. Waxaad codsan kartaa in macluumaadka qalad ah la saxo.
--

Waxaan halkan awoodda qareenimo ku siinayaa qofka halkan hoose ku xusan si uu magacayga ugu codsado ka reebidda

Magaca • Qofka haya awoodda qareenimo	Lambarka diiwaangelinta ganacsiga (CVR-nummer), haddii ay shirkad tahay
<b>Saxiixa</b> Magaca • Qofka ka reebidda codsanaya	Lambarka diiwaangelinta shacabka (CPR-nummer)
Taariikhda	Saxiixa • Qofka ka reebidda codsanaya

Xeerasha ku saabsan ka reebidda Boostada Dijital ah waxaad ka akhrisan kartaa foomka FD 001L Qaabka waxqabadka qaanuuni ah ee loogu talagalay "Codsiga ka reebidda Boostada Dijital ah", foomka lama turjumin. Si aad warbixin dheeraad ah uga hesho Boostada Dijital ah iyo fursadaha kuu diyaar ah tag halkan [www.borger.dk](http://www.borger.dk) ama la xiriiir xarunta adeegga muwaadiniinta (borgerservice) ee magaaladaada.



517084101042324

Foomka u dir xarunta adeegga muwaadiniinta (borgerservice)	Waa in magaaladu ay buuxiso		
Magaalada qofka ka reebidda codsanaya	Taariikhda la helay	<input type="checkbox"/> Aqoonsiga la bixiyey	KLE 23.15.15G01 • Aqoonsiga kiiska
Magaalada qofka haya awoodda qareenimo		<input type="checkbox"/> Xuruufta magaca ugu horraysa	

**Awoodda qareenimo ee lagu codsado ka reebidda Boostada Dijital ah ee muwaadiniinta loogu talagalay**

tix. Sharciga Boostada Dijital ah ee Dadweynaha ee Denmark

Foomkani waa turjumaadda Soomaali ee FD 001F. Waa FD 001F, ee waajib ah in la buuxiyo oo loo dhiibo xarunta adeegga muwaadiniinta (borgerservice).

**Bayaanka qofka haya awoodda qareenimo**

Marka aan foomkan saxiixo, waxaan sheegayaa in aniga la ii weydiiyey in ka reebidda Boostada Dijital ah aan ku codsado magaca

Magaca • Qofka ka reebidda codsanaya	Lambarka diiwaangelinta shacabka (CPR-nummer)
--------------------------------------	---

Maxaa dheer, waxaan halkan ku sheegayaa in aniga la i ogaysiiyey in bayaanka aan diray la saari karo ciqaabmarinta dhaarbeeneed marka la raaco qodobka/§ 163aad ee Xeerka Dembiyada ee Denmark.

<p><b>Qodobka/§ 163aad ee Xeerka Dembiyada ee Denmark</b></p> <p>Qofkii kastee keena bayaanno qalad ah ama ku markaati fura wax qofka laga hadlayo uusan ka war haynin, oo loo isticmaalo dacwado la xiriira dadweynaha, oo lagu bixiyo qoraal ama warbaahin kaloo la akhrisan karo, waxaa la saari doonaa ganaax, ama xabsi aanan ka badnayn afar bilood.</p>
--

**Saxiixa**

Magaca • Qofka haya awoodda qareenimo	
Taariikhda	Saxiixa • Qofka haya awoodda qareenimo

<p>Waa in qofka haya awoodda qareenimo uu codsiga booqasho ugu geeyo xarunta adeegga muwaadiniinta (borgerservice) ee magaaladaada.</p> <p>Qofka haya awoodda qareenimo waa in uu soo qaado kaarkiisa caymiska caafimaadka (sundhedskort) ama caddayn kaloo aqoonsi oo kaas la siman. Haddii awoodda qareenimo shirkad la siiyey, waa in wakiilka shirkaddu uu weliba muujiyo dukumeenti tilmaamaya in uu shirkadda ku xiran yahay.</p>
---

Fadlan boostada aan la furin ku soo dir addareeskan dibadda:

Addareeska:	
Boost koodka/lambar	Magaalada
Wadanka	

Waxaan addareeskan dibadda u isticmaalnaa boostada aan la furin, marka aadan helin Boosto dijitaal ah oo aad dibadda ku nooshahay.

Waa inaad addareeskaaga dibadda ka diiwaangeliso CPR. Waxaad wax badan oo ku saabsan uguuritaanka dibadda ka ogaan kartaa borger.dk, ama la xariir adeegga borger ee dowladda hoose ee aad ka soo guurtay.